

1. Ilaah wuxuu u sheegay nebi Nuux inuu soo diri doono daad burburinaya dadka oo dhan kuwaasoo aan rumaynin Ilaah. Miyaa Ilaah illoobay inuu sameeyo wixii uu yiri waan samaynayaa?

-Maya.

2. Miyaa Ilaah mar waliba sameeyaa wixii uu yiraahdo waan samaynayaa?

-Haa.

3. Ilaa iyo imisa ayuu Ilaah dhowrayey inay Isaga rumaystaan?

-Boqol-iyo-labaatan sannadood.

4. Intii Ilaah dhowrayey in dadku rumaystaan Isaga, miyaa caradiisii is-dhintay?

-Maya.

-Ilaah caradiisa dembiga way sii kordhaysaa ilaa Ilaah ciqaabo dembiga.

5. Kaddib markii Nuux dhammeeyey dhismihii doonta, Maxaa Ilaah u sii sheegay in Nuux sameeyo?

-Ilaah wuxuu Nuux u sheegay inuu qoyskiisa kexeeyo oo ay galaan doonta.

-Ilaah qudhiisa ayaa wuxuu Nuux u sheegay inuu xayawaanka soo kexeeyo oo soo geliyo doonnida.

6. Sidee baa Nuux iyo qoyskiisii ay u soo galeen doonnisa?

-Waxay ka soo galeen hal albaab.

7. Sidee baa xayawaanka oo dhan ku soo galeen doonnida?

-Waxay ka soo galeen hal albaab.

8. Kaddib markii Nuux iyo qoyskiisa iyo xayawaanka ood han ka soo galeen albaabka, maxaa Ilaah sameeyey?

-Ilaah wuxuu soo xiray Albaabka.

9. Maxaa Ilaah u xiray Albaabka?

-Si kuwa gudaha ku jira ay u badbaadaan.

-Si kuwa dibadda joogaana ayan u soo gelin, laakiin u dhintaan.

10. Miyaa Ilaah ka baxsan karaa ciqaabta?

-Maya.

11. Sidee baa Ilaah uga dhigay in dhulka oo dhan biyo daboolaan?

-Si dhulka ood hami daad u qariyo, Ilaah wuxuu soo daayey biyihii uu samada sare geeyey si ay roob oo kale dhulka ugu soo da'aan.

12. Miyaa dadku roob arkay markaa ka hor?

-Maya.

13. Maxaa ku dhacay xayawaankii oo dhan, kuwaasoo aan doonnida la soo gleinin?

-Way wada dhinteen.

14. Maxaa ku dhacay dadkii dibadda ka joogay doonnida?

-Way wada dhinteen.

15. Miyaa qaar ka mid ah kuwi gudaha soo galay ay dhinteen?

-Maya.

16. Calaamad caynkee ah baa Ilaah siiyey Nuux iyo dadkii dhulka ood han?

-Qaansa-roobaad.

17. Mxay qaansa-roobaadku u taagan tahay?

-Qaansa-roobaadku waxay u taagant ahay inaanu Ilaah mar dambe dhulka ku baabi'in doonin daad.

18. Miyaa Ilaah adkeeyey ballankaas oo miyaanu kol dambe dhulka ku halaagin Daad?

-Maya.

19. Waa kuwama wiilasha Nuuxoo noqday aabbayaasha dhulka oodhan?

-Saam, Xaam, iyo Yaafet.

-Kaddib markii Ilaah ka badbaadiyey Nuux iyo qoyskiisii, waa la soo dhaafay.

-Sannado badanna waa ka soo wareegeen, carruur badanna waa dhasheen, ilaa haddana dhulkii la soo buuxiyey.

-Yey ahaayeen dadkii dhashay Nuux ka dib?

-Waxay ahaayeen kuwii adigu aad ka soo farcantay iyo kuwii anigu aan ka soo farcamay.

-Miyaa faraceennu garanayeen Ilaah?

-Haa.

-Sidee baa farcankeennu ku ogaaday wax ku saabsan Ilaah?

-Marka ugu horraysa, waxay faraceennu ku ogaadeen Ilaah, dadkii iyaga ka horreeyey ayaa wax uga sheegay Ilaah, Oo jiilkii soo korayey ayaa wax looga sheegay Ilaah.

-Maxay dadkii waayeelka ahaa uga sheegeen jiilka soo korayey Ilaah iyo dadkii?

-Dadkii waayeelka ahaa waxay u sheegeen jiilkii soo korayey in Ilaah dembiga neeb yahay, oo uu welibana burburiyo dadka ood han waxaan Nuux iyo qoyskiisii ka ahayn.

-Sidee kale ayey faraceennu ku ogaan lahaayeen Ilaah?

-Tan labaad, faraceennu waxay wax ka ogaayeen Ilaah iyadoo ay ugu wacan tahay qaansa-roobaadka oo iyadu wax uga sheegta dadka Ilaah.

-Maxay qaansa-roobaadku dadka Ilaah uga sheegaysaa?

-In Ilaah dadka jecel yahay, iyo in aanu dunida ku burburinaynin daad.

-Sidee kale ayey faraceennu Ilaah wax kaga ogaan kareen?

-Tan saddexaad, faraceennii hore waxay Ilaah ku ogaadeen markii ay eegeen, cirka, buuraha, webiyada, iyo dhirta duurka.

-Maxaa cirka, buuraha webiyaasha iyo dhirtuba Ilaah kaga sheegeen frcankeenna?

-Ilaah oo keliya ayaa Ilaah ah, dadkuna waa inay Ilaah oo keliya raacaan.

-Miyaa qaansa-roobaadka weli wax inooga sheegaysaa Ilaah maanta?

-Haa.

-Miyaa cirka, buuraha, iyo webiyaasha, iyodhirtuba wax inooga sheegayaan Ilaah?

-Haa.

-Inkastoo faraceennu garanayey wax ku saabsan Ilaah, miyaa dadka badidiisu Ilaah rumaysteen?

-Maya.

-Qaar yar oo keliya ayaa Ilaah rumaystay.

-Intii ay Ilaah raaci lahaayeen, yey raaceen farcankeennii hore?

-Badankood dadkii aynu ka soo farcannay waxay raaceen Shayddaanka iyo beentiisa.

-Badanaa dadkii aynu ka soo farcannay waxay ku hoos jireen awoodda Shayddaanka.

-Maxaa Shayddaanku u sheegay faraceennii hore inay sameeyaan?

-Waa kan wixii Shayddaanku u sheegay faraceennii hore inay sameeyaan:

-Shayddaanku wuxuu faraceennii hore u sheegay inay qorraxda, dayaxa iyo xiddigaha caabudaan.

-Shayddaanku wuxuu faraceennii hore u sheegay inay ruuxyada caabudaan.

-Dadkeennii hore waxay qori jireen alwaaxda iyo dhagxaanta oo ay dad iyo xayawaan u ekaysiin jireen si ay u caabudaan.

-Shayddaanka wuxuu hoggaamin jiray faraceennii hore oo uu u sheegay inaanay Ilaah rumaynin.

-Shaydaanku wuxuu hoggaamin jiray faraceennii hore si ay Ilaah ugu caasiyoobaan.

-Shayddaanka wuxuu ku hoggaamiyey faraceennii hore inay caabudaan qorraxda, dayaxa iyo xiddigaha.

-Shayddaanku wuxuu ku hoggaamin jiray faraciinnii hore inay caabudaan ruuxyo.

-Shayddaanku dooni maayo in Ilaah la caabudo.

-Faraceennii hore ma uusan doonaynin in Ilaah hoggaamiyo.

-Faraceennii hore wuxuu doonayey oo keliya inaan raacno Shayddaanka iyo dadka kale.

-Kaddib daadkii weynaa, ayaa mid ka mid ah faraceenna oo ay dadku ka dambeeyeen la oran jiray Nimrod.

-Nimrod wuxuu dadkii ku amray inay dhisaan magaaloyin badan.

-Mid ka mid ah magaaloyinkii dadku dhiseen ayaa la oran jiray Baabel.

-Magaalada Baabel, ayaa Nimrod ku amray dadkii inay dhisaan qalcad dheer oo gaadha Ilaah.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 11:1-4

1-Dhulka ood hammuna wuxuu haa isku af iyo isku hadal keliya.

2-Waxaana dhacday markay xagga bari u sii socdaaleen inay waddankii Shincaar meel bannaan ka heleen; oo halkaas ayay degeen.

3-Oo waxay isku yidhaahdeen, Ina keena, aynu leben samaysanee, oo aynu aad u dubnee. Oo waxay dhagaxa meeshiisii u haysteen leben, nuuradda meeshiidana dhoobo.

4-Oo waxay yidhaahdeen, Ina keena, aynu magaalo dhisanee, iyo munaarad dhaladeedu samada gaadho. Oo aynu magac yeelannee, waaba intaasooaynu dhulka dhushiisa oodhan ku kala firidhnaaye.

-Ilaah wuxuu Aadan iyo Nuux u sheegay inay dhulka buuxiyaan, oo ay kala degaan meelo kala duwan oodhanka ah.

-Ilaah xitaa wuxuu u sheegay dadkii kaddib nuux inayd hulka buuxiyaan, oo ay ku noolaadaan meelo kala duwan oo dunida ah.

-Maxaa sabab u ah in Ilaah aanu doonaynin in dadku oo dhan ay ku wada noolaadaan isku meel.

-Ilaah dooni maayo in dadka ood han ay hal meel ku wada noolaadaan, si ay Ilaah ku illoobaan.

-Ilaah dooni maayo in dadku ay hal meel ku wada noolaadaan, si dembiyadoodu u badanin.

-Ilaah wuxuu doonayaa in dadku ay buuxiyaan dhulka oodhan, laakiin dadku waxay doonayaan inay iyaga oo dhan isku meel ku wada noolaadaan.

-Dadku dooni maayaan inay meelo kala duwan oo dunida ah ku noolaadaan.

-Dadku waxay doonayaan inay wada noolaadaan.

-Markaasina, dadka oo dhan waxay soo wada aadeen Baabel, oo waxay bilaabeen inay dhisaan munaarad dheer.

-Maxaa sabab u ah in dadku bilaabaan inay ka dhisaan munaarad dheer Baabel?

-Waayo dadka waxay ahaayeen kuwo isla weyn

-Waayo dadka waxay doonayaan inay magac isku sameeyaan.

-Markii dadku bilaabay inay dhisaan munaaraddii dheerayd, miyaanu Ilaah arkaynin?

-Haa.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 11:5

5-Rabbiguna wuxuu u soo degay inuu arko magaaladii iyo munaaraddii ay binu-aadmigu dhisayeen.

-Ilaah wuxuu arkay in dadku ay dhisayeen munaaraddii dheerayd.

-Ilaah wuxuu arkaa wax waliba.

-Ilaah wuxuu arkaa dadka oo dhan meel waliboo ay joogaan.

-Ilaah wuxuu arkaa mid waliba iyo qof waliba oo innaga inaga mid ah wakhti kasta.

-Miyaa Ilaah garanayaa fikirrada dadka oo dhan?

-Haa.

-Ka hor intaanu qofku bilaabin inuu fikir qalbigiisa soo galo, Ilaah wuu wada og yahay fikirradiisa oo dhan.

-Miyaa Ilaah garanayaa hadallada ku jira qalbiyada dadka oo dhan?

-Haa.

-Ka hor intaanu qofku hadal afkiisa ka soo bixin, Ilaah waa wada og yahay hadalladaas gebi ahaanba.

-Miyaa Ilaah garanayaa ficillada dadka ku jira oo dhan?

-Haa.

-Ka hor intaanu qofku bilaabin inuu wax sameeyo, Ilaah wuu wada garanayaa waxaas uu doonayo inuu sameeyo oo dhan.

-Dadka waxay la ahayd in Ilaah illoobay iyaga.

-Miyaa Ilaah illoobay dadka?

-Ilaah ma illooba waxa dadku ku fakarayo.

-Ilaah ma illoobo waxa dadku leeyihiin.

-Ilaah ma illoobo waxa dadku ay samaynayaa.

-Maxaa Ilaah yiri markii uu arkay in dadkii ay isaga addeeci waayeen?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 11:6-7

6-Oo Rabbigu wuxuu yidhi, Bal eega, iyagu waa isku dad

keliya, oo dhammaan isku af keliya bay leeyihiin. Oo waxanuna waa waxa ay bilaabaya inay sameeyaan, oo haatan wax ka hor joogsan doona waxay damcaan inay sameeyaan ma jiraane.

7-Ina keena, aynu dagnee, oo hlakaaas aynu afkooda iskaga qasnee, yaan midna midka kale hadlakiisa garanine.

-Maaddaama ay faraceennii hore addeeci-waayeen Ilaah, ayaa Ilaah go'aansaday inuu ciqaabo iyaga.

-Maxay ahayd ciqaabtii Ilaah go'aansaday?

-Ilaah wuxuu siiyey dadka luuqado kala duwan si dadku aanay u awoodin in midb kan kale fahmo.

-Haddii Ilaah dadka siiyey luuqado kala duwan, miyaa dadku awoodayaan inay is-fahmaan?

-Maya.

-Haddii Ilaah siiyey dadka luuqado kala duwan, miyey awoodayaan inay dhammeeyaan dhismaha munnaaradda dheer?

-Maya.

-Haddii Ilaah dadka siiyey luuqado kala duwan, miyaa dadku awoodayaan inay hal meel ku wada nollaadaan?

-Maya.

-Wakhti hore, farcankeennu waxay ku hadli jireen hal luuqad.

-Laakiin iyadoo ay ugu wacan tahay in faraceennii hore Ilaah addeeci-waayey oo diideen inay dhulka buuxiyaa, Ilaah wuxuu iyaga siiyey luuqado kala duwan.

-Magaalada Baabel, Ilaah wuxuu dadkii oo dhan siiyey luuqado kala duwan.

-Luuqadda Ingiriisku waxay ka soo bilaabatay magalada Baabel.

-Luuqadda faransiiskuna waxay ka soo bilaabatay Baable.

-Luuqadda Soomaaliguna waxay ka soo billaabatay Baabel.

-Luuqadaha oodhanna waxay ka soo bilowdeen Baable.

Kaddib markii Ilaah luuqado kala duwan dadka siiyey, maxaa kale ee uu sameeyey?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 11:8-9

8-Kolkaasaa Rabbigu halkaas ka kaxeeyey oo ku kala firdhiyey dhulka dushiisa oodhan, oo dhisiddii magaaladii way joojiyeen.

9-Sidaas daraaddeed magaceedii waxaa loo bixiyey Baable, maxaa yeelay, halkaasaa Rabbigu afkii dhulka oodhan iskaga qasay; oo halkaasuu Rabbigu ka kaxeeyey iyagii oo ku kala firdhiyey dhulka dushiisa oodhan.

-Kaddib markii Ilaah dadka oodhan siiyey luuqado kala duwan, Ilaah wuxuu iyagii oodhan ku kala yaaciyey meelo kala duwan oodhulka ah.

-Ilaah wuxuu doonayey in dadka oodhan ay buuxiyaan dhulka, laakiin dadku waxay doonayeen inay hal meel ku wada noolaadaan.

-Miyaa dadku guulaysteen mise Ilaah baa guulaystay?

-Ilaah baa guulaystay.

-Miyaa qofi Ilaah la diriri karaa oo haddana ka guulaysan karaa?

-Maya.

-Maxaa Ilaah ku sameeyaa kuwa isaga la dirira ama la dagaallama?

-Wuu ciqaabayaa.

-Ilaah wuxuu ku kala yaaciyey dadkii meelo kala duwan oo dunida ah.

-Dadka qaarkii waxay degeen meel ku dhow Baabel.

-Dadka qaarkiina waxay u guureen meel fog.

-Sidee bay kuwii aad ka soo farcantay ku soo gaareen dhulkan Soomaaliya?

-Sannado badan kaddib, farcankaagii hore waxay halkan ku yimaadeen lug iyo doonni.

-Halkaas ayey farcankaagii hore ku bilowdeen.

-Sidaasay dadka oo dhamiba ku bilwodeen.

-Farcankaagii hore waxay joogeen Baabel.

-Farcankaagii horena waxay joogeen Baabel.

-Farcanka dadka dunida oo dhamiba waxay joogu jireen magaaladii Baabel.